# Maxaa loola jeedaa baarista togan?

Mararka qaarkood baaritaanku wuxuu noqonayaa mid togan. Haddii baaritaankaagu yahay mid togan macnaheedu waa inaad qabto infekshanka HPV.

Taas macnaheedu maaha inaad qabto kansarka afka ilmagaleenka.

Waxaa laga yaabaa inaad mustaqbalka halis ugu jirto kansarka ilmagaleenka.

Dhakhtarkaaga ama kalkaaliyahaaga ayaa kaala hadli doona wixii ku xiga ee dhici doona.



**Halkee baan ku qaadan karaa Baarista Baaritaanka Afka ilmagaleenka?**

- Dhaqtarka guud (GP)
- Qorsheynta Qoyska ee Rugta Caafimaadka NSW
- Xarunta Caafimaadka ee Haweenka
- Takhasuslaha (Dhakhtarka haweenka)

## Waa maxay calaamadaha kansarka afka ilmagaleenka?

Baarista Baaritaanka Afka Ilmagaleenka waxay eegtaa HPV ku jira Afka Ilmagaleenka ka hor intaysan keenin kansarka.

Baarista Baaritaanka Afka Ilmagaleenka waxaa loogu talagalay haweenka aan qabin calaamadaha kansarka afka Ilmagaleenka.

Calaamadaha qaarkood ee kansarka afka ilmogaleenka waxay noqon karaan:

- dhiigbax ka yimaada siilka galmada kadib
- dhiigbax ka yimaada siilka mudada u dhaxaysa caadooyinka
- dhiigbax ka yimaada siilka kadib dhalmo-dayska
- dheecaan biyo-biyo ah oo ka yimaada siilka

Haddii aad qabto mid ka mid ah astaamahan macnaheedu maaha inaad qabto kansarka afka ilmagaleenka. Haddii aad qabto calaamadahaas waa inaadan sugin Baarista baaritaanka Afka Ilmagaleenka kuugu xiga. Waa inaad isla markiiba aragtid dhakhtarkaaga.

**Dheecaanka waa dureeraha ka soo baxa siilka haweenta.**


# Diiwaanka Baaritaanka Kansarka Qaranka

Waxaa jirta diiwaanka baaritaanka cusub ee kansarka halkan Australia.

Diiwaanka Baaritaanka Kansarka Qaranka wuxuu waraaqaha u diraa haweenka. Waraaqaha ayaa kuu sheegi doona markaad u baahan tahay inaad qaadatid Baarista Baaritaanka Afka Ilmagaleenka.

**Wixii macluumaad dheeraad ah, ka eeg websiteka internetka www.fpnsw.org.au/know-your-health-cervical-screening ama wac Qorshaynta Qoyska NSW ee Talkline 1300 658 886 ama ka eeg www.fpnsw.org.au/talkline.**

Si aad ula hadasho qof ku hadla luqaddaada, ka wac Adeegga Turjumaada Qoraalka iyo Tarjumida (TIS) 131 450. Weydiiso inay kugu xiraan Qorsheynta Qoyska NSW.



# Ogow caafimaadkaaga

family planning nsw
Reproductive & Sexual Health




# Barista Baaritaanka Afka ilmagaleenka

NSW GOVERNMENT

Cancer Institute NSW

# Waa maxay kansarka afka ilmagaleenka?




Jidhkeennu wuxuu ka kooban yahay malaayiin unugyo.

Unugyada cusub ayaa kora maalin kasta.

Mararka qaarkood markay unugyada ay u koraan si kala duwan waxay noqon karaan kansar.

Kansarka afka ilmagaleenka waa kansar ku dhaca afka ilmagaleenka.

Afka ilmagaleenka wuxuu ku dhex jiraa jidhka qaybta sare ee siilka

# Maxaa keena kansarka afka ilmagaleenka?

Kansarka afka ilmagaleenka waxaa keena Pap-kaillomavirus bini'aadamka. Pap-kaillomaviruska bini'aadamka mararka qaarkood waxaa loo yaqaan HPV.

Waxaa jira noocyo badan oo HPV ah. Haweenka iyo raggu waxay qaadi karaan HPV. HPV waa mid aad u badan. Qof kasta oo mar uun yeeshay xiriir galmo ayaa qaadi kara HPV.

HPV badanaa ayadaa iskeed isaga baaba'da dhibaato la'aan. Mararka qaarkood HPV waxay bedeli karaan unugyada afka ilmagaleenka. Isbeddelladani waxay noqon karaan kansar. Isbeddeladani waxay u dhacaan si tartiib-tartiib ah.

Waxay qaadan kartaa illaa 15 sano isbeddeladan si ay u noqdaan kansar. Mararka qaarkood isbeddelladani ma noqdaan kansar oo dhan. Waxaa lagaa qaadi karaa baadhitaan lagu baarayo HPV ee afka ilmagaleenka.

Xidhiidhka galmada waa taabashada maqaarka-ilaa-maqaarka oo u dhexeeya:

- xubnaha taranka ee hal qofka iyo xubnaha taranka ee qof kale ama
- xubnaha taranka iyo qaybaha kale ee jirka sida afka iyo futada

Xubnaha taranka waxaa mararka qaarkood loo yaqaan 'qaybo gaar ah'. Xubnaha taranka waa:

- guska
- dibnaha iyo siilka

# Baarista Baaritaanka Afka ilmagaleenka ee cusub

Waxaa jira baaris cusub oo Australia ah. Waxaa loo yaqaan 'Baarista Baaritaanka Afka Ilmagaleenka'.

Baarista Baaritaanka Afka Ilmagaleenka waxay eegtaa HPV ku jira Afka Ilmagaleenka. Baarista Baaritaanka Afka Ilmagaleenka ayaa beddelay baaritaanka Pap-ka.

Hadda waxa lagugu sameyn doonaa Baarista baaritaanka afka ilmagaleenka baddelkii intaad samayn lahayd baaritaanka Pap-ka. Baaritaanka Afka ilmagaleenka wuxuu kaa caawin karaa inaad ogaatid isbeddelada unugyada ka hor intaysan isu baddelin kansarka.

### Yay tahay inuu qaato Baarista Baaritaanka Afka ilmagaleenka?

Haweenka da'doodu u dhaxayso 25 iyo 74 kuwaas oo xiriir galmo yeeshay waa inay qaataan baaritaanka.

Haweenka da'da yar kuwaas oo baaritaankooda koowaad sameeyey intay da'da-dhalashadooda ahayd 25 sano.

### Goorma ayaan qaadanayaa Baarista Baaritaanka Afka Ilmagaleenka?

- Waa inaad qaadataa baaritaanka 5tii sanadood oo kasta.
- Haddii aad qaadatay baaritaanka Pap-ka ka hor Diseembar 2017, baaritaankaaga xigga wuxuu noqon doonaa laba sano kadib baaritaankaagii Pap-ka ee kuugu dambeeyey.
- Haddii aad qaadatay Baarista Baaritaanka Afka ilmagaleenka ka dib Diseembar 2017, waxaad qaadan doontaa baaritaanka 5tii sanadood oo kasta.

# Sidee loo sameeyaa Baarista Baaritaanka Afka Ilmagaleenka?

Dhakhtarka ama kalkaalisada ayaa ku weydiin doona inaad dharkaaga ka saarto dhexda ilaa hoos.

Waxaad dooran kartaa inaad xirato dhar dhaadheer. Taasi waxay sahlaysaa si aad kor u qaadi karto googorada meeshaad iska bixin lahayd dharkaaga.

Waxaad ku seexan doontaa sariirta baarista. Cagahaaga ayaa kor u qaadi doontaa adoo jilbaha soo laabi doonaa.

Dhakhtarka ama kalkaalisada ayaa isticmaali doona qalab gaar ah si unugyada qaarkood looga soo qaado Afka Ilmagaleenkaaga.

Unugyada waxaa loo diri doonaa shaybaar si loo baaro.

Dhakhtarka ama kalkaalisada ayaa ku soo wici kara marka natiijadaadu soo noqoto.

Waxaad sidoo kale ku heli kartaa natiijadaada warqad.

